



# Macluumaaad Ku Saabsan Shirarka Macallimiinta iyo Waalidka ee Dugsiyada Dhexe/Sarre

Oktoobar 23, 2020

Waalidiinta Qaaliga ee Ardayda Dugsiyada Sarre ee PPS,

Waqtigan ay ardaydu Waxbarashadoodii Caadiga ahayd ay ku Qaadanayaan Guryahooda,waxaa la sameeyey fursado ay dhammaan qoysasku ay isku diiwaangali karaan sidii ay ula xiriiri lahaayeen macallimiinta saacadaha shaqada inta lagu gudo jiro. Sidii caadada inoo ahaan jirtay sanadkii, waxaan sidoo kale bixin doonaa Shirarkii Macallimiinta iyo Waalidka(Subaxii iyo habeenkii) bisha Noofembar 23 ilaa 24keeda. Sanadka caadiga ah, Shirarka Macallimiinta iyo Waalidka waxaa lagu qabtaa sida qaolibka ah qaab saaxadda iskuulka qeybo ka mid ah, taasi oo waalidiintu ay kula kulmaan kooxaha macallimiinta qolka weyn ee ciyaaraha ama goobta ballaaran ee iskuulka waalidiintu ku kulmaan. Shirarkani waxa ay qaataan sida caadadda ah 5 ilaa 10 daqiiko, iyada oo macallimiinta ay diyaar u yihiin qaabiliaada waalidiinta sidii ay ula kulmi lahaayeen subaxii ilaa habeenkii waxaana u dhexeeya waqt nasasho ah oo ay macallimiintu ay cuntada cunayaan.

**Haddaba sanadkani, maadaama aynu shirarkii ku qaban doono qaabka online ah, waxaan rabnaa inaan xaqijino sida ugu wacan ee waalidiintu ula soo xiriiri lahaayeen macallimiinta, sidaas awgeed waxaan siineynaa waalidiinta inay shirkoodii ay kula kulmayeen macallimiinta ay ballan qabsadaan si ay xog uga helaan heerka waxbarashada ilmahooda.** Marka aad eegto sida ay uga go'an tahay Dugsiyada Dadweynaha Portrland (PPS) sidii ay kor ugu qaadi lahaayeen natijjada ardayda taariikh ahaan aan helin jirin addeegyadii ay u baahnaayeen, oo ay ka mid yihiin ardayda naafada ah iyo ardayda baranaya luqada Ingiriisida, iskuuladu waxa ay mudnaanta koowaad siin doonaan diiwaangalinta dhammaan qoysaska inay helaan boosas gaar ah ka hor inta aan la furin ballamaha shirkarka. Iskuuladu waxa ay isticmaalayaan qalabka jadwalka taarikhda online ah, sida SignUp ama Google Calendar ee ballamaha lagu qabsado. Ballamuhu waxa ay u furmi doonaan dhammaan qoysaska bisha Noofembar dhexdeeda. Iskuulkiinu wuxuu idin soo diri doonaa macluumaaad dheeraad ah wargeysyadooda todobadaada soo socda.